Xaashida Xaqiiqada

Tallaalka Fayraska Human Papillomavirus ee Hablaha Fasalka 8
(Xaashida xaqiiqada waxaa lagu heli karaa luqado badan. Eeg
http://www.toronto.ca/health/immunization_children/index.htm)

Waa maxay cudur dhaliyaha Human Papillomavirus (HPV)?

- HPV waa cudur dhaliye guud oo keeni kara nabaro cawrada ku dhaca iyo kansar marinka ilmo galeenka, siilkaa, sibiisha (jiida ku xeeran siilkaa),guska, futadaa, madaxa iyo qoorta.

Waa maxay xidhiidhka ka dhexeeya HPV iyo kansarka marinka ilmo-galeenka / nabarada cawrada?

- Dadka qaarkood, xanuunka HPV ayaa kuu horseedi kara xanuunka kansarka ama nabarada. HPV inta badan wuxuu sababa dhammaan xaaladaha xanuunka kansarka marinka ilmo galeenka Kanada gudahiisa.
- Laba nooc oo HPV ah ayaa sababa in kabadan 70% kansarka marinka ilmo galeenkan halka laba nooc oo kalena ay sababaan in ka baadan 90% nabarada cawrada ee Kanada gudaheeda.

Qaabkee ayuu u faafaa HPV?

- HPV wuxuu si guud ugu faafaa laba dub oo istaabtay xilliga galmada lamaane sadhaysan.
- Dadka qaarkood abidkood ma yeeshaan calaamada laakiin waxay haysan karaan cudur dhaliyaha waxaanay qaadsiin karaan lamaanaha ay la galmoodaan.

Waa maxay calaamadaha xanuunka HPV?

- Badi xanuunada HPV malaha wax calaamado ah. Calaamadaha waxay iman karaan bilo kadib xanuun qaadista.
- Nabarada cawarada ee uu keenay HPV had iyo jeer xanuun ma leh laakiin waxay leeyihiin cuncun iyo kadeed. Nabaradu waxay noqon karaan qaar yar yar oo badi muuqaalka koolifalaawirka.
- Haweenka, nabaradu waxay kaga dhici karaan sibiisha (dabnaha siilka), marinka ilmo galeenka korkiisa (kadinka makaanka), futada, bawdyaha, iyo afka gudihiisa.
- Raga, nabaradu waxay kaga dhaci karaan guska, kiishka dhikilaha, bawdyaha, futada iyo afka gudihiis.

Qaabkee lagu gartaa xanuunka HPV?

- Dhadiga, baadhitaanada “Pap” ayaa lagu garan karaa isbedalada marinka ilmo galeenka ee uu xanuunku HPV keenay. Labka iyo dhediga, nabarada waxaa lagu ogaan karaa baadhitaan lagu sameeyo dubka iyo jiida cawrada.

HPVma la dawayn karaa?

- Dadka caafimaadka qaba, badanaaba xanuunka HPV ayaa iskiis iska taga isagoon noqon kansar.
- Nabarada iyo isbadalad marinka ilmo galeenka ma tagaan waxaana lagu dawayn karaa iyadoo loo diyaariyo kiimiko, dareeraha nitrojiin, ama falaadha laysarka ama qaliin. Daawooyinka ayaa ka saara nabarada laakiin jidhkaaga ka saari maaayaan cudur dhaliyaha. Nabaradu dib ayey u dhacaan maadaama aanay jirin daawo loogu talogalay HPV.
- Antibaayootigu waxba kama taro daawaynta HPV.

Qaabkee ayaan u yarayn faafitaanka xanuunka HPV?

- Tallaal qaado. Tallaalka lagula taliyo hablaha fasalka 8wuxu ka hortagaya xanuunka afarta nooc ee HPV ee sababa inta badan kansarada marinka ilmo galeenka iyo nabarada cawrada.
- Iska ilaali galmada qof sadhaysan; waxaa jira had iyo jeer waxoogaa halis in la qaado xanuunka HPV xilliga galmada istaabashada labada maqaar.

Xauunka HPVma laga hortagi karaa?

- Tallaal lagu magacaabo Gardasil® ayaa hadda jira oo ka hortagaya xanuunka afarta nooc ee HPV ee sababa inta badan nabarada cawrada iyo kansarka marinka ilmo galeenka.

Xaashida Xaqiiqada

Tallaalku ma yahay ammaan?

- Haa, daraasad ayaa muujinaysa inuu yahay ammaan. Dalalka, ay ku jirto Kanada, ee tallaalku laga isticmaalo in la wado si loo kormeero badbaadada. Ciladaha halista ahi waa dhif.

Qofkee ayey tahay inuu qaato Talaalaka HPV ee Gardasil®?

- Gardasil® waxaa lagula taliyaa dhediga da'da inta u dhaxayso 9 iyo 26 jir. Talaalkani waa u bilaash hablaha fasalada 8.
- Tallaalku sidoo kale wuu u ruqsadaysan yahay labka (laakiin si dawliya looma maalgalin) da'da sagaal ilaa 26 jir.
- Tallaalku wuxuu si buuxda u shaqeeyaa haddii la qaato kahor nooc kasta oo galmo ah.

Waa maxay ciladaha talaalku leeyahay?

- Ciladaha ugu badan waa xanuun, barar, cuncun iyo guduutan jiida laga muday.
- Madax-xanuun, qandho, yalaalugo iyo dawakhaad ayaa sidoo kale dhici karta. Ciladaha kale ee sahlan waxaa ka mida cuna- barar, matag iyo shuban, dhiig kar, dhiig ka yimaada saxaaxa iyo dhaqdhaqaaqa cududa oo yaraata halka irbada laga siiyey.
- Xasaasiyado ba'an ayaa dhif ah. Islamarkiiba qaado feejignaan daawo haddii aad isku aragto finan, neef-qabatin, hiinraag ama barbar wajiga iyo afka ah.

Qofkee ay tahay in aanu qaadan tallaalka?

- Qofksata oo xasaasiyad hore ugu yeeshay irbada Gardasil® ama xasaasiyad ku leh faaxiyaha, alumuuniyam, polysorbate 80, L-histidine ama sodium borate waa inaanu qaadan tallaalka.
- Tallaalka si haboon looguma tijaabin habalaha da'doodu ay ka hooseeyso sagaal jir iyo haweenka uurka leh.

Immisaa irbadood oo tallaal ah ayaan u baahanahay?

- Daraasado ayaa muujiyey in saddex irbadood la siiyo ilaalinta dhammaystirka ugu yaran shan sannadood.
- Irbadaha waxaa waajiba in la qaato muddo lix bilood ah gudahood.
- Irbada labaad waxaa la qaataa ugu yaraan hal bil kadib iyo irbada saddexaadna oo caadiyan loo qaato lix bilood kadib irbada koowaad.

Qaabkee ayaan u heli karaa talaalka?

- Caafimaadka Dadweynaha Toronto ayaa bixisa talaal bilaa lacaga HPV oo lasiiyo hablaha dhigta fasalada 8 dugsiyada leh rugaha caafimaadka ee ku yaala xarumaha rayidka.
- Hablaha fasalada 9, kuwaas oo ku qaatay ugu yaraan hal irbada HPV fasalada 8 gudahooda, ayaa qaadan kara irbadaha talaal bilaa lacaga oo ay ka heli karaan xarumaha caafimaadka dadwaynaha.
- Qof kastoo kale oo raba inuu lacagta iska bixiyo. Isugayanta kharashka irbadaha waxa weeyaan ugu dhawaan $500. Macluumaad intaas dhaafsiisan kala hadal daryeel caafimaad bixiyahaaga. Qaar ka mida qorshayaasha caafimaad ee caymiska ayaa bixiya kharashka.

Miyey ilaa iyo hadda u baahan yihiin haweenka qaata talaalka in lagu sameeyo baadhitaan caafimaad si looga baadho kansarka ku dhaca marinka ilmo galeenka?

- Haa. Haweenka galmada aadka ugu fara dhudhuuban ayaa qaata talaalka ilaa iyo haddana waxay u baahan yihiin inay maraan baadhitaanada caafimaadka gaarka ah.
- Talaalka HPV ayaa kaa ilaalinaya labada nooc ee HPV kaas oo sababi kara kansarka ku dhaca marinka ilmo galeenka.
- Ilaa iyo hadda waxaa suurtogal u tahay haweeenka laga talaalay inay ka qaadeen nooca naadirka ah ee HPV kaas oo laga yaabo inuu sababo kansar.

Goobtee ayaan ka heli karaa macluumaad intaas dhaafsiisan?

- Lahadal dhaktarkaaga ama daryeel caafimaad bixiyahaaga, ama booqo barta shabakadayada www.toronto.ca/health ama wac telefoon lambarka Khadka Macluumaadka Talaalka Caafimaadka 416-392-1250.